



Folkhälsomyndigheten

NYA REKOMMENDATIONER FÖR VACCINATION MOT COVID-19, MARS 2023, SOMALISKA

Talo soo jeedin xiriir la leh tallaalka loog hortago cudurka Covid-19

Talooyinka cusub waxay khuseeyaan laga bilaabo 1 Maarso 2023 ilaa 29 Febraayo 2024. Halkaan ayaad ka helaya warbixin ku saabsan da'da lagula talinayo in la talaalo.

Tallaalka ka dhanka ah covid-19-ku wuxuu ka ilaalinayaa cudur khatar ah iyo dhimasho. Hada, waxaa ka jira difaac wanaagsan ku dhowaad dhammaan dadka ku nool Iswiidhan oo ka dhan ah COVID-19. Baadhitaankii ugu dambeeyay ee difaaca jirka ee COVID-19 ayaa muujinaysa in ugu yaraan 94 boqolkiiba dadka la baaray ay leeyihiin jirarka lidka ah. Carruurta iyo dhallinyarada qaangaarka ah, difaac ayaa lagu dhisay inta badan iyada oo loo marayo hal ama in kabadan oo ah caabuqa COVID-19. Dadka da'da ah, waxaa jira badbaadi ay ka helayaan caabuqa iyo talaal labadaba.

Si kastaba ha ahaatee, badbaadinta ayaa loo baahan yahay in lagu daro tallaabooyin dheeraad ah sanadka soo socda oo loogu tala galay dadka da'doodu ka bilaabato 50-jir. Tani waxaa kale oo ay quseysaa dadka da'doodu ka yar tahay 50 sano, kuwaas oo ka tirsan kooxaha halista ku jira.

Hay'adda Caafimaadka Dadweynaha ee Iswiidan ayaa si joogto ah u falanqeysa horumarinta fayraska SARS-CoV-2, tallaalka iyo sida uu u faafo safmareenka. Aqoonta cusub waxay ka dhigan tahay in Hey'adda Caafimaadka Dadweynaha ee Iswiidan ay si isdaba joog ah u beddesho talooyinkeeda ku aaddan talaalka covid-19. Talooyinka cusubi waxay ansax yihiin ugu badnaan hal sano, laga bilaabo 1 Maarso 2023 ilaa 29 Febraayo 2024.

Talooyinka cusub ee la adeegsan karo laga bilaabo 1 Maarso 2023

Halkan waxaa ku qoran talooyinka maamulka ee kooxaha da'da kala duwan iyo kooxaha khatarta u ah. Talooyinku waxay khuseeyaan laga bilaabo 1 Maarso 2023 iyo ugu dambeyntii ilaa 29 Febraayo 2024:

80 sano iyo ka wayn, iyo sidoo kale dadka deggan SäBO

Dadka da'doodu u dhaxayso 80 sano iyo wixii ka weyn, iyo sidoo kale dadka deggan SäBO (guryo u gaar ah oo loogu talagalay dadka waayeelka ah), waxaa lagula talinayaa laba qadar inta lagu jiro muddada u dhaxaysa 1 Maarso 2023- 29 febraayo 2024. Soo jeedintu waxay khusaysaa iyadoon loo eegin tiradii hore ee tallaalka.

- Muddada u dhaxaysa labada qiyaasood: ugu yaraan 6 bilood.

Da'daas ayaa lagula talinayaa in la tallaalo asaasi ah oo leh 3 tallaal oo kala duwan: tallaalka koowaad (2 qadar) oo ay ku xigaan qiyaasta oo dib loo buuxinayo maya ka hor afar bilood ka dib.

65-79 sano iyo dadka ku jira kooxaha khatarta ku jira ee 18 sano

Dadka da'doodu u dhaxayso 65-79 sano, iyo sidoo kale dadka ku jira kuwa khatarta ku jira ee da'doodu u dhaxayso 18-jir iyo wixii ka weyn, waxaa lagula talinayaa hal qiyaas inta u dhaxaysa 1 Maarso 2023–29 Febraayo 2024. Qiyaasta waa in ugu horayn la siiyaa xilliga dayrta iyo jiilaalka 2023/24. Soo jeedintu waxay khusaysaa iyadoon loo eegin tiradii hore ee tallaalka.

Tallaal dheeri ah ayaa la heli karaa mudada u dhaxaysa 1 Maarso 2023 ilaa 29 Febraayo 2024.

- Muddada tallaalka: ugu yaraan 6 bilood tan iyo markii laga soo bilaabo qiyaastii ugu dambaysay.

Da'daas ayaa lagula talinayaa in la tallaalo asaasi ah oo leh 3 tallaal oo kala duwan: tallaalka koowaad (2 qadar) oo ay ku xigaan qiyaasta oo dib loo buuxinayo maya ka hor afar bilood ka dib.

50–64 sano jir

Dadka da'doodu u dhaxayso 50–64 sano waxaa lagula talinayaa hal qiyaas inta u dhaxaysa 1.3.2023–29 Febraayo 2024. Qiyaasta waa in ugu horayn la siiyaa xilliga dayrta iyo jiilaalka 2023/24. Soo jeedintu waxay khusaysaa iyadoon loo eegin tiradii hore ee tallaalka.

- Muddada lagu tallaalayo: ugu yaraan 9 bilood u dhaxayso tan iyo kii u danbeeyay la sameeyay.

Da'dan waxaa lagula talinayaa in la tallaalo asaasi ah oo leh sadex tallaal oo kala duwan: tallaalka koowaad (2 qadar) oo ay la socoto tallaalo dib loo buuxinayo afar bilood ka dib, laakiin waqti dheer waa uun faaiido.

18-49 sano

Dadka da'doodu u dhaxayso 18–49-sanno, wax talo ah oo ku saabsan qadar tallaal buuxin ah malahan. Sidoo kale waxaa la joojinayaa talada saddexda qiyaasood oo ah tallaalka aasaasiga ah laga bilaabo 1 Maarso 2023. Hal qiyaas oo la qaato waxaa la qaadaa inta lagu jiro mudada u dhaxeysa 1.1.2023-29 Febraayo 2024 iyadoon loo egeynin tiradii hore ee la qaatay waana la qaadan karaa tusaale ahaan haddii aad degan tahay goob dad waayeel ah amaba dad ku jira koox halis qaba.

- Muddada lagu tallaalayo: ugu yaraan 9 bilood u dhaxayso tan iyo kii u danbeeyay la sameeyay.

Tallaal aasaasi ah oo 3 daawo ah ayaa la sii wadi doonaa.

Jadwal gaar ah oo loogu talagalay dadka leh nidaamka difaaca jirka oo hoos u dhacay

Dadka leh habka difaaca jirka oo hooseeya, ayaa la filayaa in difaaca jirka oo daciif badan kii hore. Sidaa daraadeed waxaa lagu taliyaa in la tallaalo iyadoo jadwal gaar ah leh oo leh qiyaaso badan sida uu dhigayo warqad dhakhtar oo gaar ah.